Taariikh
2018-05

Somaliska

Warqad macluumaad rasmi ah oo shaqo doonka loogu tala galay arbetssökande
-
Nystartsjobb

Shaqo-bilaabid cusub

Haddii aad ahayd bilaa shaqo wakhti dheer ama aad ku cusubtahay Iswiidhan wuxuu shaqo bixiyuhu heli karaa gunno dhaqaale si laguu shaqaalaysiiyo. Taageeradan waxaa lagu magacaabaa *shaqo-bilaabid cusub*.

Shaqa bixiyuhu kaalmo lacageed ma igu qaadan karaa?

Shaqo bixiyuhu wuu heli karaa kaalmo lacageed haddii aad adigu ka diiwaan-gashantahay Xafiiska Shaqada oo aad ahayd bilaa shaqo wakhti dheer[1]. Laakiinse shaqo bixiyuhu kaalmo lacageed ma ku heli karo shaqaalaysiin horey u socotay. Adigu xitaa ma billaabi kartid shirkad oo ma samayn kartid inaad adigu isku shaqaaleysiisid shaqo-bilaabid cusub. Si shaqo bixiyuhu u helo kaalmo lacageed waa inaad tahay qof ka maqnaa nolosha shaqada iyo aad

[1] Adigu **buuxisay 20 laakiin aadan buuxin 25 sano** aadna si buuxda shaqo la'aan u ahayd ugu yaraan 6 bilood oo ka mid ah 9 bilood ee la soo dhaafay.
Sannadkan gudihiisa ma buuxisay **25 sano ama in ka badan,** si buuxdana ma u ahayd shaqo la'aan ugu yaraan 12 ka mid ah 15 bilood ee la soo dhaafay.

Haddii aad ahayd qof guriga joogay oo hayay ilmo xanuusanaya oo ka yar laba sano waxaad adigu ka boodi kartaa wakhtigaas si ay aad u buuxiso shuruuddan. Haddii ilmuhu yahay ilmo aan lasoo korsaday waxaa ansax ah laba sano ka dib markii adigu aad heshay ilmaha.

- ka diiwaan-gashanaa shaqo raadiye ahaan dhinaca Xafiiska Shaqada
- ka qayb qaatay barnaamij siyaasadeedka suuqa shaqada
- helay lacagta bukaanka, gunnada baxnaaniska, gunnada bukaanka ama gunnada dhaq-dhaqaaqa
- helay taageero dhaqaale ama kaalmada dhaqaale sida ku cad cutubka 4 farqradiisa 1 § ee sharciga adeega bulshada (2001:453) oo isla markaana aad ahayd bilaa shaqo

Shaqo bixiyuhu xitaa gunno wuu heli karaa haddii adigu aad

- timid Iswiidhan ugu badnaan saddex sano ka hor oo helay sharciga qaxoontinimo, baahi magan-gelyo ama xaaladaha qaarkood iyadoo ay sabab u tahay in loo soo guuray qof qoyska ah
- timid Iswiidhan ugu badnaan saddex sanno ka hor oo helay kaarka deganaanshaha ee qaraabanimada qof u dhashay dalalka EES-dalalka iskaashiga dhaqaale ee Yurub
- ka qayb qaadataa barnaamijka sal-shigashada sida ku cad xeerka (2017:820) ee ku saabsan hawlaha sal-dhigashada ee loogu talogalay qaar ka mid ah ajaanibka dalka ku cusub, ama aad qorshe sal-dhigasho ku leedahay Xafiiska Shaqada sida ku cad go'aamadi berigi hore

Af 00008_1.1_(2016-08-02, AF2000)

Taariikh
2018-05

Svenska

Warqad macluumaad rasmi ah oo shaqo doonka loogu tala galay arbetssökande
-
Nystartsjobb

- lagugu xukumay xabsi ugu yaraan hal sanno oo laguu ogolaaday joogista xabsiga banaankiisa ama si shuruud wadata laguu sii daayay laakiin aanad dhamaysan hal sanno oo ka mid ah wakhtiga tijaabada.
- ka qayb qaadataa barnaamijka damaanad qaadka shaqada iyo horumarinta.

Maxay yihiin qaababka shaqaaleysiin ee ay khuseyso kaalmada lacageed?

Kaalmada lacageed waxay khuseysaa shaqooyinka joogtada ah iyo shaqooyinka waqtigoodu go’anyahay. Taasi waxay xitaa khuseysaa shaqooyinka xilliga shaqada qeyb ka mida ah.

Mushaaro noocee ah iyo faa'iidooyin noocee ah ayaan anigu helayaa?

Waxaad si waafaqsan heshiiska wadajirka ah xaq ugu leedahay mushaar iyo waxyaabo kale oo shaqaalaha faa’iido u ah. Haddii shaqo-bixiyuhu aanu haysan heshiiska wada-jirka ah waa in si kastaba ha ahaatee adigu aad heshaa mushaaro iyo faa'iidooyin qaybahaha ugu muhiimsan ay u dhigmaan ta heshiiska wada-jirka ah. Waxay taasi ka dhigantahay in shaqa bixiyuhu uu sidoo kale ceymis ku gelinayo.

Imisa ayuu shaqa bixiyuhu kaalmo lacageed ahaan u helayaa?

- Haddii adigu aad buuxisay 20 laakin aadan buuxin 25 sano, kana maqnayd nolosha shaqada xilli 6 bilood - ilaa 2 sanno ah, wuxuu shaqo bixiyuhu helayaa lacag u dhiganta khidmada shaqo bixiyaha (31,42%).
- Haddii aad buuxisay 25 sanno ama ka badan sannadkan gudihiisa, kana maqnayd nolosha shaqada xilli 1 - 2 sanno ah, wuxuu shaqo bixiyuhu helayaa lacag u dhiganta khidmada shaqo bixiyaha (31,42%).
- Haddii aad buuxisay 20 sanno ama ka badan, kana maqnayd nolosha shaqada muddo 2-3 sanno ah, wuxuu shaqo bixiyuhu helayaa lacag u dhiganta 2 jibbaar khidmada shaqo bixiyaha, haddii ka maqnaanshada suuqa shaqadu ka badantahay 3 sanana, wuxuu shaqo bixiyuhu khidmada shaqo bixinta helayaa 2,5 jeer.
- Haddii aad tahay qof waddanka ku cusub, una qalmo iyadoo ay sabab u tahay sharci deganaansho, kaarka deganaanshaha ama iyadoo loo maray in laga qayb qaato barnaamijka sal-dhigashada, wuxuu shaqo bixiyuhu helayaa lacag u dhiganta 2,5 khidmada shaqo bixiyaha. Shaqo-bilaabida cusub waa inay bilaabantaa gudaha 36 bilood laga soo bilaabo markii sharciga deganaanshaha la bixiyay, ama ilaa iyo inta shaqo raadiyuhu ka qayb qaadanayo barnaamijka sal-dhigashada. Adigaaga haysta qorshe sal-dhigasho ah waxaad u qalantaa ilaa iyo inta qorshaha sal-dhigashadu socdo.
- Haddii aad ka qayb qaadato damaanada shaqada iyo horumarinta markaas gunnadani waxay u dhigantaa hal ah khidmada shaqo bixiyaha.

Taariikh
2018-05

Svenska

Warqad macluumaad rasmi ah oo shaqo doonka loogu tala galay arbetssökande
-
Nystartsjobb

Shaqo bixiyuhu gunno ku helaa qaybta mushaarada ee ah ilaa iyo 20 000 karoon calaa bil xilliga shaqo wakhti buuxa ah. Xilliga shaqo wakhti nus ah waxaa taageerada loo yaraynayaa si u dhiganta.

Ilaa imisa ayuu waqti ahaan shaqo bixiye qaadan karyaa kaalmo lacageed?

Xafiiska Shaqada ayaa xisaabinaya dherarka wakhtiga uu shaqo bixiyuhu heli karo gunno. Haddii aad buuxiso shuruudo badan oo ah in laguugu shaqaaleysiiyo shaqo bilaabid cusub wuxuu Xafiiska Shaqadu dooranaya shuruudaha ugu faa'iidada badan shaqo bixiyaha.

- Haddii aad buuxisay 20 sano laakiin aadan buuxin 25 sano inta ugu badan ee kaalmada la bixinayo waa 1 sano.
- Haddii aad buuxisay 25 sano ama in ka badan inta ugu badan ee kaalmada la bixinayo waa 2 sano.
- Haddii aad buuxisay 20 sanno ama ka badan oo aad u qalanto ka dib xukun xabsi markaasi gunnada ugu badan waa 2 sanno.
- Haddii aad ugu qalantay iyadoo la soo maray dhinaca damaanad qaadka shaqada iyo horumarinta markaasi gunnada ugu badan waa 1 sanno.

Dhamaan shaqo bilaabidyada cusub waxaa waajib ka ah in gunnada la bixin karo ugu badnaan dhamaadka sannadka aad buuxinayso 65 sanno.

Muxuu qof walba sameynayaa?

Shaqo bixiyaha ayaa dalbanaya shaqo-bilaabida cusub ee adiga laguugu talogalay, laakiin adiga laf ahaantaadu waa inaad buuxiso foom ay ku qorantahay wakhtiyadi aad ahayd bilaa shaqo oo aad tani u dhiibtaa ama u soo dirtaa Xafiiska Shaqada. Foomkan waxaad ka helaysaa www.arbetsförmedlingen.se/nystartsjobb ama Xafiiska Shaqada ee kuugu dhow. Mararka qaarkood waa inaad soo dirtaa caddayn.

- Haddii aad qaadatay kaalmada masaariifta ama kaalmada dhaqaale waxaad kamuunka ka codsanaysaa caddayn.
- Haddii aad qaadatay lacagta bukaanka, gunnada baxnaaniska, gunnada bukaanka ama gunnada dhaq-dhaqaaqa waxaad Qasnada Caymiska ka codsanaysaa caddayn.
- Haddii lagugu soo xukukmay xabsi waxaad Daryeelka Dembiilayaasha ka codsanaysaa caddayn.
- Haddii aad shaqaale ka soo ahayd Samhall waa inaad dhiibtaa koobi la xaqiijiyay oo ah caddaynta shaqaalaysiintaada. Koobi la xaqiijiyay micnahiisu waa in qofkii madaxda kuu ahaa ee hore ama qof kale oo jooga Samhall saxeexo caddaynta shaqaalaysiinta ee ah inaad ka soo shaqaysay Samhall.
- Haddii aad heshay sharci deganaansho ama kaarka joogitaanka waa inaad dhiibtaa koobiga go'aanki arrintan.

Taariikh
2018-05

Svenska

Warqad macluumaad rasmi ah oo shaqo doonka loogu tala galay arbetssökande
-
Nystartsjobb

Maxaan u baahanahay inaan anigu sameeyo?

Foomkan iyo shahaadadaada u dhiib ama u soo dir anagayaga joogna Xafiiska Shaqada. Tani muhiim ayay u tahay si anagu aanu u awoodno inaan go'aamino arrinta shaqo-bilaabida cusub. Si shaqo bixiyahaagu u helo gunno waxaa khasab ah in anagu aanu go'aamino ka hor intaan shaqaalaysiintani bilaabmin.

Adiga waa inaad ka diiwaan-gashantahay Xafiiska Shaqada marka anagu aanu go'aaminayno arrintan shaqo-bilaabida cusub. Adigu waxaad is diiwaan-gelin kartaa marka aad dhiibayso foomkan iyo caddayntaada.

Xeerar

Xeerka (2018:43) ee taageerada loogu talogalay shaqo-bilaabid cusub

Miyaad doonaysaa inaad wax dheeraad ah ogaato?

Naga soo wac 0771-416 416 haddii aad xiisaynayso oo aad doonaysid inaad wax dheeraad ah ka ogaato. Adigu waxaad xitaa booqan kartaa Xafiiska Shaqada ama geli kartaa arbetsformedlingen.se.